



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Febraayo 19, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Ka wareegista iLearn ee loo wareegayo Workday

Farriintani waa mid dhammaan hawl-wadaagayaasha iyo wax daneeyayaasha Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) la socodsiinaysa, oo ay ku jiraan hay'adaha maamulka kiiska iyo daryeel bixiyayaashu, in Waaxda Maamulka Adeegyada (DAS) ay ka wareegayso iLearn Oregon una wareegayso Workday Learning, oo taariikhda la filayo tahay Juun 2021.

Tani waxay ka dhigan tahay in tababarada mustaqbalka ee ay u baahan yihiin ODDS iyo Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon, oo ay ku jiraan awoodaha wax qabasho ee muhiimka ah ay ka tirsanaan doonaan nidaamka Workday Learning halkii ay ka noqon lahaayeen iLearn. Waxaanu rabnaa in aanu hay'adaha maamulka kiiska iyo daryeel bixiyayaasha iyo daneeyayaasha kale la socodsiino hadda si ay u bilaabi karaan is diyaarinta.

ODDS waxay weli waxyaabo dheeraad ah ka ogaanaysaa sida isbeddalkani u dhici doono, iyo sida uu u saameyn doono daryeel bixiyayaasheena iyo ha'daheena maamulka kiiska. Waxaanu sii wadi doonaa in aan macluumaadka cusub idinla socodsiino oo ay la socdaan ilaha iyo macluumaadka hadba sida aan u ogaano.

Ilaa hadda, waxaanu idinka codsaneynaa in aad bilawdaan nidaamka idinka oo dhammaan macluumaadkaaga tababarka ee hadda jira ku keydinaya iLearn. ODDS waxay ogaatay in qoraalada dhanka tababarka

ee ku jira iLearn ay dhici karto in aan loo wareejin Workday. Waa muhiim in dhammaan daryeel bixiyayaasha iyo CME aad keydisaan qoraaladiina dhanka tababarka ee faylashiina shaqaalaha ee loogu talagalay xubin kasta oo shaqaale ah. Waxaan ku soo lifaaqnay tilmaamo la raacayo oo ku saabsan sida qoraaladiina loogu keydiyo iLearn dhexdiisa.

Haddii aad jeclaan lahaydeen macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan wareejinta nidaamka maareynta waxbarashada loo wareejinayo Workday Learning fadlan fiiriya macluumaadka ku qoran [website-ka mashruuca LMSRP](#). Fadlan sidoo kale waxaad hubisaan wada xiriirka mustaqbalka ee ka socda ODDS marka aanu ogaano waxyaabo dheeraad ah.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.